


tilmaamaha codbixiyaasha

Side Loo Calaamadeeyo Waraaqda Codbixinta

Si aad u codayso, adoo adeegsanaaya qalinka lagu siiyay, buuxi goobinta sheegaysa dookhaaga, sidaan oo kale:



Si aad u Codayso

Calaamadee waraaqda codbixinta adoo ku buuxinaaya goobinta geeska midig, kasoo horjeedka magaca musharixiinta aad dooranayso. Waraaqda codbixinta ayaa sheegaysa tirada ugu badan ee musharixiinta loo codayn karo halkii tartan ba. Waxaad u codayn kartaa tiro ka yar cadadka ugu badan ee lagu sheegay tartan kasta, **laakiin uma codayn kartid wax ka badan.**

Waraaqda Codbixinta la xariirta Su'aasha Ra'yi aruurinta

Markay jirto cod bixinta dib u sharciyayn ama su'aal taagan, ku calaamadee waraaqda cod bixinta adoo buuxinaaya goobinta ku hortaala jawaabta "Yes (Haa)" ama "No (Maya)".

Geli mid kasta oo kamid ah waraaqahaaga codbixinta galka gaarka ah ee sirta ah si aad u qariso meelaha aad camaalamadaysay halka saxiixa ku xigeenka soo saaray waraaqaha cod bixinta loo jeedo.

Kadib markaad Calaamadaysay Waraaqahaaga Codbixinta

U keen waraaqaha codbixinta ku xigeenka jooga meelka codbixinta. Ku xigeenka, ayaa xaqiijin doona saxiixyada ku qoran waraaqaha cod bixinta, kaa caawinaaya ku ridista waraaqda codbixinta galka iyo sanduuqa codadka.

Codadka Halaabay

Haddii aad u calaamadaysay codkaaga si khaldan, ama aad u qaladay qaab kale, waad soo celin kartaa waxaadna mid badal ah ka qaadan kartaa ku xigeenka tii hore ku siiyay.

Haddii waraaq codbixin jeexan tahay, ciladawdo ama haddii kale wasaqoowdo uuna haleeyo cod bixiye ilaa cod bixiyaha laga aqoonsan karo, codkaas waa la diidi doonaa lamana tirin doono.



Qofka ayaa codayn kara halmar



Waa danbi inaad waraaq cod bixin kala baxdo xarunta codaynta